

OKTOOBAR 2022

DHAWAQ!

Miyaad Cabsanysaa?

Waa Oktoobar oo dad badan ayaa tan u tixgaliyaa wakhtigii “Xilli cabsi leh”. Wakhtigee ayay ku fiicantahay in laga hadlo cabsida, saamaynteeda iyo sida aan uga gudbi karno!



Ku Dhufashada Goobta Macaan

Cabsidu maaha had iyo jeer inay noqoto shay xun. Dareemida cabsidu waa dareencelin dabiici ah oo waynu u baahanay si ay inoogu baraarujiso khatarta. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaar, cabsidu waxay ku iman kartaa qiyaaso mararka qaar aad u sareeya ama xitaa aad u hooseeya. Haysasho la'aanta cabsi ku filan waxay keeni kartaa inuu qofku qaato go'aamo khatar ah sida inaynu iska eegin labada dhinac ka hor intaanu ka gudbin waddada. Dhinaca kale arrintani, inaad yeelato cabsi aad u badan cabsidu waxay ku keeni kartaa qofka inaanu waligiis ka bixin gurigooda. Hadafku waa inaad hesho “goobta macaan” ama miisaanka. Tusaalaha sare arrintani waxay u eekaan kartaa ka tagida guriga si aad u socdaasho lakiin aad raacdo nalalka traafiga oo aad eegto labada dhinacba marka aad ka gudbayso dariiqyada.




Ka fogaanshiyaha iyo Soo bandhigida

Mid ka mid ah falcelinta ugu badan ee waxyaabaha aynu ka cabsano waa inaynu iska ilaalino. Si kastaba ha ahaatee, sidaan kor kaga soo hadalnay, arrintani waxay keeni kartaa hababka la qabsiga caafimaad la'aanta sidoo kale waxay inaga dhigi kartaa inaan wax ilawno. Soo bandhigida cabsidayada qiyaaso yaryar marka aan ku celcelinayno la qabsiga xirfadaha caafimaadka leh ayaa naga caawin kara dareen la'aanta awooda cabsida oo aan ka gudubno caqabadaha ay leedahay. Hal dariiqo oo lagu sameeyo arrintan waa in la sawiro jaranjaro leh meel kasta oo u dhaxaysa 5 iyo 10 talaabo. Ku qor hadafkaaga talaabada ugu saraysa. Adigoo ka bilaabaya xaga hoose, la imo yoolal yaryar oo aad ku tobabaran karto, ku shaqee jidkaaga ilaa inta aad ka gaadhayso talaabada ugu adag. Tusaale ahaan: Haddii aad la kulanto cabsida ah inaad ka baxdo guriga talaabadaada ugu saraysa waxay noqon kartaa, tagida dukaamaysiga 1 saac. Talaabooyinka yaryar aadd arrintan ku gaadhi kartaa waxay noqon karaan taagnaanshiyaha alabaabkaaga waxoogaa daqiiqado ah maalin kasta, kadibna hore u soconaya oo aad ka fogaanayso gurigaaga.

Buug Lagu Talinayo

Jonathan James iyo Whatif Monster oo ay qortay Michelle Nelson-Schmidt

Buugga dhexdiisa, wiil dhalinyaro ah oo la yidhaahdo Jonathan James ayaa su'aal ka keenay Whatif Monster's "kawaran haddii uu jiro" oo waxa uu baadhayaa awoodiisa welwelka iyo cabsida.



Geeska Farshaxanka: Buugga Argagaxa

Mararka qaar cabsideenu waxay inoo horseedi kartaa dareen argagax leh. Ka hor inta aynaan ka shaqayn xallinta ama hadafka, waxaynu u baahanay inaynu diirada saarno dajinta maskaxdeena iyo jirkeena. Hawshani waxay dhiirigalinaysaa ka qayb qaatayaasha si ay u qoraan buug ay ka buuxaan sawirro kuwaasi oo ka caawinaya inay is dejiyaan inta lagu guda jiro xaaladaha walaaca oo ay ka caawiso inay maskaxdooda dib ugu soo jeediyaan wax ka wanaagsan.



Qalabka aad u baahantahay: Buug xasuus qor ah ama buug sawir gacmeed, calaamadaha ama hal-abuurka dhexdhexaadka ah ee la doorbiday, qalab kasta oo farshaxan oo aad jeclaan lahayd inaad ku darto bogaagga (jarista joornaalada, wargeysyada, buuggaag sawireed hore, dhalaal, warqad dhisme)

Habka: Ku samee sawirro bogagga buugga xasuus qorka kuwaasi oo kicinaya dareenka degenaanshiyaha iyo raaxada. Bal qiyaas sawirada shayada aad jeceshahay, meelaha aad jeceshahay, midabada wax dejiya, iyo in kabadan. Looma baahn inaad buuxiso dhammaan bogagga, hayso meel aad ku badesho fikradaha raaxada. Ku hay meel u dhaw buugga xasuus qorka si aad u yeelato jahawareer iijaabo iyo hab diirada lagu saarayo dareenka dagaanaanshiyaha wakhtiga walaacu jiro.